



Immigrant Women Services Ottawa  
Services pour femmes immigrantes d'Ottawa

## Arjiga Xubnimada Sannadka/Cusboneysiinta

### Macluumaadka Xariirinta

Magaca	
Cinwaanka	
Magaalada, Dagmada, Koodka Boostada (City, Prov., Postal Code)	
Telefoonka Guriga	
Telefoonka Shaqada	
Emailka	
Nambarka Fakska	

### Qeybaha Aqoonta CC

\_\_\_\_ Horumarinta iyo Qiimeynta Brograamka      \_\_\_\_ Horumarinta Siyaasadda      \_\_\_\_ Qaaraanka  
\_\_\_\_ Qorsheynta Istraatijiyada      \_\_\_\_ Suuqgeynta iyo Isgaarsiinta

### Khidmadda Xubnimada: \_\_\_\$ 25.00

\_\_\_\_ Waxaa ku dhex jira khidmadeyda xubnimada      \_\_\_\_ iyo/ama Aniga in aan bixiyo deeqda \_\_\_\$

*Fadlan waxaad jeegga iyo arjiga oo dhamaystiran u soo gudbisaa:  
Immigrant Women Services Ottawa 219 Argyle Avenue, Suite 400 Ottawa ON K2P 2H4*

### ***Xasuusin: Xubnimada waxay hoos timaad ogolaashada Guddiga IWSO***

**ANIGA WAXAAN RABAA IN AAN XUBIN KA NOQDO IWSO. ANIGA WAAN AKHRISTAY/WAAN MAQLAY IYO WAAN FAHMAY UJEDDOOYINKA URURKA IYO WAXAAN SI FIRFIRCOON U TAAGEERSANAHAY**

\_\_\_\_\_  
Saxiixa

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

\_\_\_\_\_  
Taariikhda la helay

\_\_\_\_\_  
Taariikhda la ogolaaday

### **Manaafacaadka xubnimada      \* Maxaa dan ah oo kuugu jirto?**

- In joogto warar looga helo IWSO
- In laga qeybgalo dhamaan shirarka xubnimada
- In la doorto xubnaha guddiga Shirka Guud ee Sannadka (Annual General Meeting)
- In heerka guddiga looga shaqeeyo arrimaha khaaska
- In laga qeybgalo Munaasabada khaaska
- Resiidyada canshuurta ee la xariiro deeqda \$20.00 ama ka badan

Xubnimada waxay u furan tahay dhamaan dadka taageera ujeedooyinka IWSO oo dhamaystira iyo saxiixa foomka xubnimada. Xubnimada laguma wareejin karo qof kale. (Fiiri dhinaca dambe).



Immigrant Women Services Ottawa  
Services pour femmes immigrantes d'Ottawa

## ARAGTIDENA

Ciribtirka dhamaan qaababka ku xad gudubka ka soo horjeedo dumarka iyo caruurta iyo gaarista sinaanta bulshada iyo dhaqaalaha ee la siiyo dumarka laga tirada badan yahay ee soo haajiray lana arki karo.

## HIMILADENA

Adeegyada Dumarka Soo Muhaajiriinta ee Ottawa (Immigrant Women Services Ottawa) (IWSO) waxay u jirtaa in ay dumarka soo haajiray ee xagjirka ah iyo qoysaskooda ku sugan Magaalada Ottawa iyo deegaanka ku wareegsan siiso taageerada iyo qalabka ay ku gaaraan awoodooda buuxda bacdamaa ay yahiin xubnaha bulshada Canada iyo ka qeybgalaan burburinta dhamaan noocyada ku xadgudubka ka soo horjeedo dumarka iyo caruurta.

## UJEEDOYINKENA

Ujeedooyinka waxay yahiin:

1. In kor loo qaado garashada dumarka soo haajiray ee xagjirka ah loona geystay xad gudubka, si loogu suurto geliyo in ay ka baxaan gooni joogga loona doodo.
2. In la gaarsiiyo la-tallinta shiddada iyo adeegga taageerada la siiyo dumarka lagu xad gudbo.
3. In la bixiyo adeegga tarjamada luqadda si loo kaalmeeyo dumarka soo haajiray si ay u helaan adeegyada buuxa ee bulshada iyo dadweynaha.
4. In la bixiyo adeegyada kale iyo/ama brograamyada kaalmeyn doono dumarka soo haajiray ee ku sugan safarkooda si ay u helaan awood buuxda.
5. In tababarka dareenka la siiyo bixiyeyaasha adeegga iyo wakaaladaha xagga baahida ay qabaan dumarka soo haajiray si loo hubiyo in adeegyada jira la heli karo iyo in ay ku habboon yahiin dumarka soo haajiray iyo qoysaskooda.
6. In lala shaqeeyo muhaajiriinta iyo bulshada kale xagga barashada ku saabsan dagaalka ka soo horjeedo dumarka iyo in la dhiirigeliyo lana taageero iyaga in ay qaataan mas'uuliyadda ka saaran waxbarashada sii socota ee ku saabsan arrintaan.
7. In la xoojiyo hiilada ka dhexeyso dumarka laguna dhiirigeliyo in ay talaabo wadajir ka qaadaan dhamaystirka dagaalka ka soo horjeedo dumarka.
8. In lala shaqeeyo ururada deegaanka, qaranka, iyo caalamka ee wadaaga ujeedada in la soo afjaro dagaalka ka soo horjeedo dumarka.